



Adoonsiga iyo ka Ganacsiga Dadka

Adoonsiga iyo ka Ganacsiga Bani'aadaka waa dembiyo daran Australia gudaheeda.

Adoonsiga iyo ka ganacsiga dadka waxay ka soo horjeedaan sharciga.

Qofka gala dembiyadan wuxuu u geli karaa xabsi, haddii yahay nin ama naag.

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Booliiska Australia waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**

Australian Government uma dul qaadan doonto adoonsiga casriga ah ama ka ganacsiga dadka xaalad kasta oo jirta.

Ka ganacsiga dadka iyo adoonsiga waxay dhacaan marka dadka lagu khasbo xaalado dhiigmiirasho oo qof kale faa'iido u ah. Waxay ku dhici kartaa ragga, dumarka iyo carruurta. Adoonsiga iyo ka ganacsiga dadka waxaa ku jira kara:

- adoonsiga, u shaqeyn ama uga shaqeynta si khasab ah wershadaha sida mihnadaha soo dhaweynta, dhismaha, keymaha, macdanta ama beeraha, iyo sidoo kale xiriirada dhow;
- deyn ku adoonsiga;
- ku dhiigmiirashada galmada;
- guurka khasabka ah; ama
- ka ganacsiga oo ujeedadu tahay in xubin lagala baxo.

Adoonsiga iyo dadka ka ganacsigu waa dembiyo qarsoon.

Adoonsiga iyo ka ganacsiga dadka waa dembiyo ay adag tahay in la ogaado. Waxaa laga yaabaa in dadku ay sameeyeen aysa caawimaad raadsan sababtoo ah waxay ka baqayaan aargoosiga dhiigmiirtayaashooda ama luminta xaalada sharcigooda socdaalka.

Calaamadaha laga yaabo inay tilmaamaan qofka laga ganacsanayo waxaa ku jiri kara meesha qofku:

- lagu khasbay, hanjabay ama lagu khasbay inuu shaqeeyo;
- la geeyo xaalado shaqo oo xun;
- aan lacag la siin ama u muuqda inuu dib u bixinayo deyn badan oo uu leeyahay loo shaqeeyahooda ama qof saddexaad; ama
- aga heysto baasaboorkooda ama dukumiintiyada kale ee uu hayo qof saddexaad, oo aysan heli karin dukumiintigan markii ay rabaan.

Adigu, ama qof aad taqaanid miyey khatar ku jiraan?

Haddii adiga ama qofaad taaqaanid uu ku jiro, khatar adoonsi ama ka ganacsiga dadka waxaad kala xiriiri kartaa **Australian Federal Police (AFP) 131 237** (131AFP) ama gal website ka **AFP** ee ah **www.afp.gov.au** wixii caawimaad ah. **AFP** waxay kuu heyn kartaa si ammaan ah, ku siin kartaa tallo oo ay kuu gudbin karaan adeegyo kale wixii taageero ah sida hoy, taageero lacageed, la talin iyo tallada sharci iyo socdaalka.

Support for Trafficked People Program waa barnaaj ay maalgelisay Dawlada oo ay bixiso Australian Red Cross si ay u siiso caawimaad dadka ah dhibanayaasha adoonsiga iyo ka ganacsiga dadka.

Waxaa jira adeegyo kale oo ku caawin kara Australia gudaheeda.

1800RESPECT waa adeega qaranka ee kala talinta xadgudubyada galmada, qalalaasha qoyska iyo guriga (Australia's national sexual assault, family and domestic violence counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin online ka ah iyo taleefanka ah oo qarsoon bilaashna ah. La-taliyayaashu way ku dhageysan doonaan, kana jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna kuu gudbin karaan adeegyada taageero ee kale kuna yaal xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama kagal website ka **1800RESPECT** ah **www.1800RESPECT.org.au**.

Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac **Translating and Interpreting Service (TIS) 131 450**. Turjumaan ka socda TIS ayaa kaa caawin kara inaad la hadashid adeegyada kale, si kastaba ha ahaatee TIS ma bixiso la talin. Dhammaan wacitaanadu waa bilaash qarsoon oo gaar ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka ganacsiga dadka iyo adoonsiga gudaha Australia:

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Support for Trafficked People Program gal website ka Department of Social Services ee **www.dss.gov.au** ama website ka Australian Red Cross ee **www.redcross.org.au**. Waxaad sidoo kale ugu diri kartaa iimeylka Australian Red Cross ee **national_stpp@redcross.org.au**.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ka ganacsiga dadka iyo adoonsiga, gal website ka Department of Home Affairs ee **www.homeaffairs.gov.au** ama website ka Australian Federal Police ee **www.afp.gov.au** oo raadi "human trafficking".